

## Oggolaansho Ka Qeybqaadasho Cilmi-Baaris

Waxaa lagaa codsanayaa inaad ka qeybqaadato daraasad cilmi-baaris ah. Intaadan oggolaan, cilmi-baaruhu waa inuu kuu sheegaa:

- i. ujeeddada, habka la raacayo, iyo muddada ay qaadanayso cilmi-baarista;
- ii. habkasta ee tijaabada loo isticmaalayo;
- iii. wixii khatar ah oo ka imaan kara, dhibaatooyin kale, faa'iidada cilmi-baarista;
- iv. hababka ama dawooyinka kale ee aad muhiim u ah;
- v. sida xogtaada loo dhowri doono.

Kolkii ay noqotaba, cilmi-baaruhu waa inuu kuu sheegaa:

- i. magta iyo daawada aad heli kartid haddii dhaawa kusoo gaaro;
- ii. wixii khatar lama filaan ah ee kugu dhici kara;
- iii. xaaladaha uu cilmi-baaruhu kaaga reebi karo ka qeybqaadashada;
- iv. wixii qiimo ee kugu kacay;
- v. waxa kugu dhacayo haddii aad go'aansato inaad joojisid ka qeybqaadashada;
- vi. gorta lagu sheegayo natiijoyinka ka soo baxa cilmi-baarista taasoo laga yaabo inay saameeyso ka qeyb qaadashadaada; iyo
- vii. tirada dadka cilmi-baarista ka qeybqaadanaya.

Haddii aad oggolaatid inaad ka qeybqaadato, waa in koobi lagaa siiyaa warqaddan iyo qoraal kooban oo cilmi-baarista ku saabsan.

Waxaad la xiriir kartaa \_\_\_\_\_ telefonka \_\_\_\_\_ markasta ee aad qabtid su'aal cilmi-baarista ku saabsan.

Waxaad la xiriiri kartaa \_\_\_\_\_ telefonka \_\_\_\_\_ haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan xuquuqdaada laxiriirta cilmi-baarista ama aad rabtid inaad ogaatid waxa aad sameyn laheyd haddii dhaawac ku soo gaaro.

Khasab ma aha inaad cilmi-baarista ka qeybqaadato; haddii aad diiddo ama aad markii aad rabto iska joojiso, cidna kuma ciqaabi karto ama wax aad heli jirtay laguuma diidayo.

Saxiixa warqaddan macnaahisu waa in lagu sharxay warbixinta cilmi-baarista sare, iyo inaad adigoon cidi ku khasbin dooratay inaad ka qeybqaadato.

\_\_\_\_\_  
Saxiixa Ka Qeybqaataha

\_\_\_\_\_  
Taariikhda

\_\_\_\_\_  
Saxiixa Markhaatiga

\_\_\_\_\_  
Taariikhda